

Fududaynta xulashada Alberta

Oktoobar 04, 2022

Dowladda Alberta waxay dadka ku cusub ka caawinaysaa in ay helaan guri guulna ku gaaraan gudaha Alberta iyaga oo adeegsanaya bog internetka ah kaasoo soogalootida ku taageeraya macluumaad iyo ilo ku qoran 15 luuqadood oo kala duwan.

Haddii qof uu ku fakarayo in uu Alberta yimaado, [Websaytka Opportunity Alberta](#) iyo [hagaha](#) ayaa hadda u diyaarsan si uu uga caawiyo go'aan qaadashadooda. Dadka ku cusub waxay mustaqbalkooda ka hiigsan doonaan gobolkeenna, ilaha la tarjumayna waxay ka caawin doonaan in ay helaan macluumaadka ay u baahan yihiin. Haddii ay u imaanayaan in ay ganacsi ka bilaabaan, kusoo biiraan dugsiyadeena heerka caalami ah, ama ay shaqo ka helaan, kaalmadu waa mid u diyaarsan riyoyinkooduna waa ay kaga midho dhalin karaan.

“Dowladda Alberta waxay ku dadaalaysaa in ay hesho qaabab si dhab ah meesha loogaga saarayo caqabadaha hortaagan in soogalootidu si guul ah ugu milmaan gobolkeenna. Macluumaadka cusub ee maanta waa tallaabo muhiim ah si loo xaqiijiyo in Alberta sii ahaato meel qof walba uu fursad ka heli karo si uu fikradihiisa ganacsi u dhaqan galiyo, u helo shaqo waxtar leh qoysna ugu korsado.”

Jason Kenney, Premier

Iyaga oo adeegsanaya hagaha ku qoran luuqaddooda ay doorbidayaan, dadku waxay wax badan ka ogaan karaan hindisooyika sida midka dowladda ee [Alberta Advantage Immigration Program](#). Waxaa jira waddooyin badan oo dowladdu dadka ugu magacowdu in ay helaan deggenaanshaha rasmiga ah ayada oo la adeegsanayo marino diiradda lagu saarayo meelaha ay ka mid ka yihiin goobaha

baadiyaha ah, ardayda soo qalinjabisay ee ajanabiga ah iyo shaqaalaha ajanabiga ah.

Qorshaha Fairness for Newcomers Action Plan ee Alberta wuxuu ballan qaaday in uu baabiiyo caqabadaha jira si dadka ku cusub ay hammigooda hal abuurka ganacsiga iyo xirfadahooda u keenaan Alberta. Kani wuxuu kamid yahay isbadalada faraha badan ee caqabadaha meesha looga saarayo. Maadaama bulshada gobolku ay sii badanayso ayna noqonayso mid kala jaad ah, dowladda Alberta waxaa ka go'an in ay bixiso macluumaad iyo ilo i ay ku taageerto fursadaha loogu tala galay dhammaan reer Alberta.

Bookho alberta.ca/opportunity si aad wax badan uga ogaato aadna ula soo degto hagaha oo ku qoran luuqadaha soo socda.

- Ingiriisi
- Faransiis
- Isbaanish
- Tagalog
- Jayniis (midka fudud iyo kii asalka ahaa)
- Carabi
- Hindi
- Kuuriyaan
- Beershiyaan
- Soomaali
- Bunjaabi
- Urdu
- Fiitnamiis
- Yukrayniyaan

Barnaamijka Alberta Advantage Immigration Program waa barnaamij dhaqaale kaasoo dadka u magacaaba deggenaansho rasmi ah oo Alberta gudaheeda ah. Dowladda federaalka ayaa gaadhaysa go'aanka kama danbaysta ah.

Macluumaadka la xiriira

- [Fursadda Alberta \(Opportunity Alberta\)](#)

The logo for Alberta's Recovery Plan features the text "ALBERTA'S RECOVERY PLAN" in a bold, white, sans-serif font. The text is contained within a white rectangular border that is partially open at the top right corner, where a yellow rectangular element is attached. The entire logo is set against a dark blue background.

ALBERTA'S RECOVERY PLAN

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.